

6 ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA: GAADHIDA GO AANKAAGA

Waxaad soo gudbisay codsiyadaada kulliyada oo hadda sugida ciyaartu way bilaabantaa. Tani waxay qaadan kastaa meel kasta laga bilaabo bilaa ilaa dhowr bilood, iyaddoo ku xidhan nooca dugsiga. Kulliyaduhu suuragal ahaan waxay la xidhiidhi doonaan go'aankooda dhexda iimaylka, boostada ama madashooda onlaynka ah. Ha ilaabin inaad ka hubiso qaaxda qaabilada kulliyada haddii aad hayso su'aalo.

WAXAAN GO'AAN KA HELAY KULLIYADA, MACNAHEEDU WAA MAXAY?

La ogolaaday – Waa lagu ogolaaday. Hambalyo!

Liiska sugiga – Laguma diidin lagumana aqbalin. Kulliyadu waxay sugaysaa inay aragto int ay tahaya rdayda aqbali doona deeqdooda si loo go'aamiyo, haddii ay hadhay meel dheeraad ahi.

La diiday – Laguma aqblain. Ka feker sahaminta doorashooyinka kale ee kulliyada.

Go'aaminta waxay tahay kulliyada la tegyaa way adkaan kartaa, laakiin helida dugsiga saxda ah ee aad leedahay, waxay kaa caawun kartaa guul iyo qalanjebin. Kala hadal la taliyahaaga dugsiga sare wax ku saabsan doorashooyinka.

SIDEEN ISKU BARBAR DHIGAA KULLIYADAHAA?

Dhaqaalaha:

Ka feker inta uu leeyahay kharashka soo xaadirka ay daboolayaan **deeqaha** iyo **deeqaha waxbarasho**.

Ka feker sida adiga iyo qoyskaagu aad u dabooli doontaa gol daloolda qarashka waxabarashadaada kulliyada oo dhan.

Tacliinta:

Hubi haddii maadada xooga la saarayo **tacliinta** aad xiisaynaysaa laga geli karo kulliyada. Ka feker noocyada **taageerada tacliinta** la heli karo (tusaale, xarunta qoraalka, waxbarida xisaabta, adeegyada naafada, iwm).

Bulshadda:

Go'aan ka gaadh haddii kulliyadu ay tahay mid si wanaagsan ugu habboon bulshadda iyo dhaqanka (tusaale, kala duwanaanshaha, kooxaha ardayda, fursaddah waxbarida, iwm).

Ka feker nooca deegaanka aad jeceshahay (u dhow guriga, wayn, banaanka kulliyada, goob miyi ah, iwm).

*HA ILAABIN:

Marka aad gaadhay go'aamadaadii kulliyada, waa inaad **ku wargelisaa kulliyada addoo xaqiijinaya diiwaangelintaada**. Wax badan 4-sano kulliyadaha muddada ay dhacaysaa waa Maayo 1.

MAARSO: FASALKA 12

WANAAGSAN IN LA OGAADO: Tani waa mid ka mid ah go'aanada ugu wayn ee aad samayn lahayd noloshadaa. **Inaad qaadato wakhti aadkaga fekerto** waxa ay kulliyad kastaa bixinayso. Ha ka baqan inaad rayi ka hesho xubnaha qoyskaaga, macalimiinta ama barayaasha.

